Waaxda Kastamada

Xafiiska Dib-u-habaynta &

Casriyaynta Kastamada (CRMS)

# Nidaamka Cadaynta Kastamada Somaliland

## Habka Cadaynta Badeecadda Ganacsiga (GDP)

# Ujeedada Casharka

- In lagu fahamsiiyo sharciyan waxa looga baahanyahay ganacsadaha marka uu cadaynayo/xaqiijinayo badeecadiisa ganacsi (GDP).
- In laguu sharaxo masuuliyadda ganacsadaha iyo sarkaalka/saraakiisha Kastamada marka la cadaynayo badeecadda ganacsiga - GDP.
- In tilmaan buuxda lagaasiiyo sida loo buuxinayo Foomka Cadaynta Badeecadda (GDF).
- In laguu sharaxo faa’iidooyinka nidaamka cadaynta badeecaddu u leeyahay ganacsadaha iyo faa’iidada uu u leeyahay Kastamada.



# Nidaamka Cadaynta Kastamada

Qeexitaanka Cadaynta Kastamada:

Waa Qoraalkasta ama talaabo kasta oo Kastamadu u yaqaanaan ama u aqoonsanyihiin in xog lagu siiyo kastamada suda;

- Waa maxay alaabadu; iyo
- Waa maxay qiimeheedu.



# Cadaynta Badeecadda Kastamada sida uu dhigayo Xeerka Kastamada Xeer Lr. 73/2016

**Qodobka 4: Qeexista Kastamada:**
(21) ‘**Cadaynta Kastamada**’ waxaa loola jeedaa ficilka ay dadku/ganacsatadu ku soo bandhigayaan hab-qoraalk foom ah iyaga oo raacaya habka kastamada ee cadaynta badeecadda.

**Qodobka 62 Shuruudaha samaynta cadaynta badeecadda**

(1)....... Cadaynta kastamada waxaa cadayn kara cid kasta oo awood u leh in ay soo bandhigto ama xaqiijiso badeecadda, hab su’aala ama u soo bandhigaya saraakiisha kastamada isaga oo soo raacinaya dhamaan dukumantiyada loo baahanyahay in uu soo bandhigo si loo dabaqo shuruucda kastamada




Prosperity From Revenue

CRMS

# Cadaynta Kastamada sida uu dhigayo Xeernidaamiyaha Xeerka Kastamada 03/2019

## Xeerka 90- Masuuliyadda Cadeeyaha

..... Soobandhigista cadaynta/xaqiijinta badeecadda ee uu **sexeexay ganacsadaha ama wakiilku**......Ganacsadaha ama Wakiilka ganacsadaha ee cadeeyay badeecadda ayaa masuul ka noqonaya;

- **Xaqiiqada lagu xusay** foomka cadaynta badeecadda
- Saxnaanshaha **dukumantiyada la soo bandhigay**.....




Prosperity From Revenue

CRMS

# Wareegto Wasiir WHM/02/08-01/1524/2019

- 20/09/2019, Wasiirka Horumarinta Maaliyaddda ayaa sexeexay wareegto lagu dhaqan galinayo Nidaamka Cadaynta Badeecadda- GDP.

- Wareegtadu waxa ay sheegaysay in ganacsatada ama wakiiladoodu ay masuul ka noqdaan buuxinta foomka cadaynta badeecada. Sidoo kale ku lifaaqaan dukumantiyada cadaynta u ah.

- Ilaa amar danbe/war danbe qaansheegta badeecadda (invoices) waxaa lagu soo bandhigi karaa si mutadawacnimo ah/ si aan khasab ahayn.



# Cadaynta Ganacsatada

Nidaamka/Dukumantiga caalamiga ah ee badanaa loo isticmaalo nidaamka cadaynt badeecadda waa SAD (SINGLE ADMINISTRATIVE DOCUMENT).

Si ay Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu iskugu diyaariso, nidaamka cadaynta Kastamada ee SAD-ka, waxa ay dhaqan-galisay nidaamka cadaynta badeecadda iyada oo la adeegsanayo habka fududaynta cadaynta ee Foomka Cadaynta Badeecadda

Foomkan waxaa looyaqaanaa: Foomka Cadaynta Ganacsiga (GDF).

Foomka Cadaynta Badeecadda – GDF, waxaa la heli karaa isaga oo Soomaali iyo English ba ah.

Jamhuuriyadda Somaliland | Republic of Somaliland
Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda | Ministry of Finance Development
Waaxda Kastamada | Customs Department

## GOODS DECLARATION FORM

| | | |
|---|---|---|
| CUSTOMS STATION: | | |
| Date: / / | 4. Delivery Order: | 44. MoT Licence: |
| Consignee: | | 9. TIN: |
| 14. Declarant/Representative: | | |
| 18. Transport: | 34. Origin: | 40. BL/AWB: |

Attached: (Tick box) D.O. ☐ Invoice ☐ Packing List ☐ BoL/AWB ☐

| Item No. | Product Description | Qty | Units |
|---|---|---|---|
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |

Goods and quantities to be listed by Declarant. False declarations of goods may be liable to penalties.
Hantiluhu/Wakiilku waa inu so cadeeya tirade badecada. Caddaymaha been abuurka ah waa lagugu qanaxaya.

I declare that the details above are true to the best of my knowledge:

Name of Declarant: ____________________ Signature: ____________________

# Cadaynta Ganacsadaha ee Badeecaddiisa

Foomka Cadaynta Badeecadda - GDF waxaa loo sameeyay si la mida Foomkii Hubinta Badeecadda/Foomkii Cadaynta ee hore ee ay isticmaali jireen ganacsatada iyo kastamadu.

Waxa loo baahanyahay in lagu qoro macluumaad aasaasiya oo la xidhiidha nooca gaadiidka iyo cida ganacsiga leh ama cida uu u raranyahay;

Waxaa loo baahanyahay in si buuxda loo qoro magaca ganacsi ee badeecadda;

Waxaa loo baahanyahay dukumantiga gaadiidka iyo midka ganacsi in lagu lifaaqo foomka cadaynta badeecadda ;

Waxaa loo baahanyahay in Ganacsaduhu Saxeexo Foomka Cadaynta Badeecadda.

Jamhuuriyadda Somaliland | Republic of Somaliland
Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda | Ministry of Finance Development
Waaxda Kastamada | Customs Department

GOODS DECLARATION FORM

| | | |
|---|---|---|
| CUSTOMS STATION: | | |
| Date: / / | 4. Delivery Order: | 44. MoT Licence: |
| Consignee: | | 9. TIN: |
| 14. Declarant/Representative: | | |
| 18. Transport: | 34. Origin: | 40. BL/AWB: |
| Attached: (Tick box) | D.O. ☐ Invoice ☐ Packing List ☐ | BoL/AWB ☐ |

| Item No. | Product Description | Qty | Units |
|---|---|---|---|
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |

Goods and quantities to be listed by Declarant. False declarations of goods may be liable to penalties.
Hantiluhu/Wakiilku waa inu so cadeeya tirade badecada. Caddaymaha been abuurka ah waa lagugu qanaxaya.

I declare that the details above are true to the best of my knowledge:

Name of Declarant: ____________________ Signature: ____________________

# Habka Buuxinta Foomka Cadaynta Badeecadda







Kastamka: Ku qor Kastamka Alaabtaada Kala soo dagtay.
Taariikhda: Gali taariikhda GDF-ka loo soo bandhigay Kastamka.
Warqadda Dalabka: Gali lambarka warqadda dalabka ganacsiga ee D.O
Liisanka W/Ganacsiga: Gali liisan lambarka W/Ganacsiga ee Ganacsadaha
Lambarka Cashuur Bixinta ee Ganacsadaha (TIN): Gali Lambarka Cashuurbixinta ee Ganacsadaha ay alaabtu u rarantahay/soo dajiyay
Cidda Ganacsiga leh: Gali magaca Ganacsadaha ay alaabadu u rarantahay/la soo dagay

CRMS

# Habka Buuxinta Foomka Cadaynta




CADEEYAHA/XAQIIJIYE: Ku qor magaca qofka samaynaya cadaynta badeecadda.
GAADIIDKA: Ku qor magaca Markabka/Duulimad lambarka/Lambarka taarikada gaadhiga.
ASALKA: Ku qor magaca wadanka badeecadda laga soo dhoofiyay.
BoL/AWB: Ku qor lambarka BoL/AWB.
Sax calaamadda ku haboon sanduuqyada, hadii aad dukumanti ku lifaaqday.




CRMS

# Habka Buuxinta GDF







LAMBARKA SHAYGA: Ku qor lambarka alaabada/shay-yada (1,2,3).
QEEXISTA SHAYGA: Ku qor macluumaadka alaabada oo dhamaystiran.
XADDIGA: Ku qor xadiga alaabada la cadeeyay.
HALBEEGGA: Ku qor halbeega xidhiidhka la leh alaabooyinka (Tusaale ahaa; unit, kg, I.WM)

Markaas waa in uu cadeeyuhu galiyaa Magaciisa ama sexeexa GDF.

# Maxaa isbadalay?

**Markii hore**

1. **Badeecadda ganacsi waxaa loo bandhigi jiray Kastamada;**
2. **Kastamadu waxa ay ku soo qori jireen liiska alaabada/badeecadda foomka baadhista;**
3. **Foomka baadhista waxaa saxeexi jiray Kastamada**

**Talaabada 1 - 3** →

**Marka danbe**

1. **Ganacsadaha/Wakiilku waxa uu buuxinayaa foomka cadaynta badeecadda GDF. Kadibna waa saxeexayaa si uu u xaqiijiyo cadaynta badeecaddiisa;**
2. **Ganacsada/wakiilku cadaynta badeecadeed ee uu sameeyey iyo dukumentiyada ku lifaaqan ba waxa uu u gudbinayaa Kastamada;**
3. **Kastamadu way hubinayaan badeecadda la cadeeyay. Waanay saxeexayaan si ay u xaqiijiyaan in badeecadda loo cadeeyay si sax ah.**

**Waxba isbadali maayaan/Isbadal majiro**

4. **Liiska badeecadda waxaa loo dhiibayaa sarkaalka qiimaynta, si loo kala saaro badeecadda (classification of goods). Qiimahana waxaa laga qaadanayaa Buuga Qiimaynta (VB) ee Kastamada.**
5. **Ganacsadaha/wakiilka cadeeyaha ahi waxa ay bixinayaan uun cashuurtii Kastamka;**
6. **Badecada/alaabada waa la siidaynayaa**

CRMS

# Masuuliyadaha La kala leeyahay

## Masuuliyadda saaran cadeeyaha (Ganasade/wakiil)

1. In uu qoro macluumaadka gaadiidka oo dhamaystiran iyo in uu buuxiyo foomka cadaynta badeecadda - GDF;

2. In uu ku lifaaqo dukumentiga gaadiidka iyo ka badeecadda/ganacsiga. Kadibna saxeexo Foomka Cadaynta badeecadda, kastamadana u bandhigo badeecadeecadiisa/alaabadiisa;

3. In uu alaabada u diyaariyo in baadhis lagu sameeyo.

Fiiro Gaara: Foomka Cadaynta waxa uu ganacsadaha/wakiilku sii buuxin karaan inta aanu markabka/gaadiidka alaabada sidaa soo xidhan/ gaadhin dalkan, isaga oo adeegsanaya dukumentigiisa ganacsi, si uu u fududeeyo nidaamka cadaynta.

## Muuliyadda saaran Kastamada

1. In ay hubiyaan si quman/saxa loo buuxbuuxiyay khaanadaha xogta ganacsiga ee foomka cadaynta iyo in dukumentiyadii loo baahnaa lagu lifaaqay;

2. In la diiwaangaliyo foomka cadaynta-GDF-ka. Isla markaasna uu saxeexo sarkaalka baadhaha kastamku;

3. In ay dhamaystiraan baadhista tooska ah (physical examination) ee badeecadda/alaabada, lana sexeexo GDF-ka si loo hubiyo hubaantinimada cadaynta badeecadda;

4. In GDF-ka loo gudbiyo "Xafiiska Qiimaynta Kastamka", si loo kala saaro noocyada badeecadda, loona qiimeeyo, si waafaqsan Buuqa Qiimaynta (VB).

**Qiimayaasha Badeecadda ilaa hadda waxaa laga qaadanayaa Buuga Qiimaynta (VB)**

Prosperity From Revenue

CRMS

# Ganaaxyada (penalties)

- Foomka Cadayntu (GDF), waxa uu ka digayaa in la sameeyo **cadayn been ah** alaabooyinka ay ku waajibtay ganaaxyadu;
- Maamulaha Kastam kasta waxa uu sharciyan xaq u leeyahay in uu baadho goob kasta oo lagu arkay macluumaad aan iswaafaqsanayn;
- Hadii maamuluhu rumaysanyahay in khaladka dhacay uu ahaa mid **aan loogu talo talo galin**. Isla markaasna aan badheedh ahayn si cashuurta iyo takaaliifta loo lunsado, **wax ganaaxa la saari maayo**;
- Hadii ganacsaduhu si saxa uga cadaysto/uga la baxo Kastamada, ku waajibi maayso wax ganaax ahi.

Prosperity From Revenue

# Tilmaamaha Nidaamka Buuxinta Foomka Cadaynta

- Hagaha/Tilmaamaha nidaamka buuxinta foomka cadaynta badeecadda- GDF ayaa la diyaariyay iyada oo English iyo Somali ah.

- Nuqulada hagayaashan/timaamahan waxaa laga heli karaa mareeg warbaahineedka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda (MoFD website).

- Sidoo kale nuqulo daabacan (had copies) ayaa laga heli karaa Kastam kasta.



# Faa'iidooyinka Nidaamka Cadaynta Badeecadda -GDP

**Waxa ay waafaqsantahay Shuruucda Kastamada**

- Xeerka Kastamada; Xeer Lr 73/2016, waxa uu waajibinayaa nidaamka cadaynta badeecaddu in uu waajib ku yahay cidda ganacsiga leh ama wakiilka ka ah. Cadaynta shaqsiga ah (self-declaration); waxa loola jeedaa cadaynta/xaqiijinta uu sameeyo qofka badeecadda ganacsi la soo dagay ama wakiilkiisu, isaga oo raacinaya ama ka buuxinaya dukumentiyada sharciga ah.

**Waxa ay waafaqsantahay Nidaamka guud ee Cadaynta Kastamada**

- Kastamada iyo Ganacsatadu reer Somaliland waxa ay leeyihiin ujeedo midaysa; in hawsha kastamada la fududeeyo, iyo in la horumariyo nidaamka cadaynta badeecadaha si loo fududeeyo ganacsiga

**In la dadajiyo nidaamka cadaynta badeecadda**

- Foomka GDF-ka cadeeyuhu waxa uu buuxin karaa inta aanu markabka badeecadda sidaa soogaadhin dakadda isaga oo isticmaalaya dukumentiyada ganacsiga. Baadhista kastamadu kaliya waxa ay noqonaysaa in foomka cadaynta badeecadda ee la buuxiyay lagu hubiyo alaabada, lana fududeeyo baadhista alaabada, lana dadajiyo.
- Foomka GDF-ka, waxaa lagala dagi-karaa (downloaded from) mareegta waasaaradda maaliyadda. Foomka oo daabacanna waxa aad ka heli kartaa Kastamada dalka.



# Faa'iidooyinka Nidaamka Cadaynta Badeecadda GDP

**Horumarinta Hubaanti ahaanta Xogta Ganacsiga**

- Dawladda Somaliland waxa ay ka heli-doontaa xog ganacsi oo sugan, si ay ugu adeegsato nidaamka qorshaynta iyo dajinta Miisaaniyadda
- Nidaamka Cadaynta ee hadda waxaa lagu isticmaalaa, qiimayn khayaali ku dhisan marka la qiimaynayo alaabooyinka la soo dajiyo. Ma jirto meel laga heli karo macluumaad xogeed rasmiya;
- Dawlad wax-ku oola oo casri ahi waxa ay u baahantahay, in ay yeelato xog ganacsi oo la isku halayn karo.





# Faa’iidooyinka Foomka Cadaynta Badeecadda - GDP

**Waxa uu horumarinayaa sugnaanta xogta ganacsiga**

- In dawladda Somaliland hesho xog-sugan oo ganacsi, waxa ay ka caawinaysaa qorshayaasheeda iyo dajinta miisaaniyadda (Planning and budgeting);
- Nidaamka cadaynta ee haddu, waxa lagu isticmaalaa qiimayn aan xaqiiqo ku dhisnayn, oo lagu qiimeeyo badeecadaha dibadda laga soo dajiyo. Sidaas daraadeed xog inagu filan oo ganacsi kama heli karno.
- Dawlad wanaagsan oo casri ahi-na, waxa ay u baahantahay in ay hesho xog ganacsi oo la isku halayn karo.

# Faa'iidooyinka Nidaamka Cadaynta Badeecadda GDP

**Ururinta Xogta la xidhiidha Maaraynta Khataraha**

Mustaqbalka, dhiiri-galin ganacsi ayay heli doonaan ganacsatada u hogaansanta shuruucda Kastamadu sida; in gaadhigaaga hore loo baadho/loona sii daayo gaadhigooda ganacsi. Ganacsatada u hogaansanta nidaamka cadaynta waxaa lagu xaqiijin karaa sida;

- Marka koowaad Kastamadu waxay awood u leeyihiin in ay qiimeeyaan cidda/ganacsadaha nidaamka cadaynta u hogaansama iyada ooo la qiimaynayo xogta cadaynta ee ganacsadaha sida; dukumantiyada i.w.m;
- Sidoo kale Kastamadu waxa ay isticmaalidoonaan "Nidaamka Qiimaynta Khataraha". Iyaga oo baadhaya alaabooyin/badeecado gaara. Ma samayn doonaan baadhis 100% ah



# Faa'iidooyinka Foomka Cadaynta Badeecadda - GDP

**Waxa ka faa'iidi doona Ganacsatada Sharciga u hogaansanta**

- Ganacsatada sharciga u hogaansanta waxaa lagu abaal marindoonaa in loo fududeeyo ganacsigooda. Waase ganacsatada buuxisa dhamaan shuruudihii nidaamka cadaynta badeecadda ganacsi;
- Nidaamka fududaynta cadaynta badeecadaha ganacsi ayaa haatan laga fuliyay Berbera oo lagu tijaabiyay ganacsato tirsan. Waa nidaamka loo yaqaano PAD-ka (Nidaamka Qadinka ee Cadaynta Badeecadda);
- Kastamadu waxay wadaan nidaam lagu maaraynayo khataraha kastamada. Waxaanay baadhidoonaan uun badeecadaha qaar. Laakiin mustaqbalka, 100% baadhimaayaan sida haatan.




PROFR
Prosperity From Revenue

# Nidaamka Cadaynta Qadinka ah ee Badeecaddaha Ganacsiga-PAD

- Nidaamka PAD-ku, waxa uu fursad u siinayaa, ganacsatada u hogaansanta nidaamka cadaynta badeecadaha kastamku, in ay si qadin ah/hor-u-marin ah u cadayntaan badeecadooda ganacsi, iyada oo aan dalka soo gaadhin. Waxaanay adeegsanayaan, nidaamka maamulka Kastamada ee lagu shaqeeyo. Waxaanay ku bixinayaan cashuuraha iyo takaaliifta xaqqa loogu leeyahay;
- Baadhitaan loogama baahna marka ay alaabadiisu soo gaadho, ganacsatada nidaamka PAD-ka isticmaala;
- Fursad waa loo siin karaa PAD-ka, ganacsatada kale ee u hogaansanta shuruucda nidaamka cadaynta badeecadaha.



Prosperity From Revenue

CRMS




# Maaraynta Khataraha -(RM)

- Waaxda Kastamada ee WHM waxa ay dhawaan aasaastay, qaybta Maaraynta Khataraha Kastamada (RMU) oo xarunteedu tahay Xarunta Kastamada;
- Nidaamka maaraynta khataraha ayaa haatan la wadaa dhamaystirkeeda. Waxaana lagu bilaabidoonaa sadex khad oo ay marayaan dadka badeecad ganacsi ama waxa ay sitaan cadaynayaa:
- RM processes are under development to introduce a three lane system for Customs declarations:
  - Khadka Cagaaran (Green lane) – Cadaynta uu ganacsadaha/Wakiilku sameeyay, waxaa la sii daynayaa iyada oo aan la baadhin;
  - Khadka Hurdiga ah (Yellow lane) – Cadaynta uu ganacsadaha/Wakiilku sameeyay, waxaa la hubinayaa uun dukumantiga uu sito (Baadhis toosa waxaa la samayndoonaa uun hadii laga shakiyo dukumentiga uu soo bandhiga);
  - Khadka Cas(Gaduudan) (Red lane) - Cadaynta uu ganacsadaha/Wakiilkiisu sameeyay waxaa la marinayaa baadhis toosa.

PROFR
Prosperity From Revenue

CRMS

# Macluumaadka la baahiyay iyo Hagayaasha

Macluumaadka la xidhiidha, nidaamka cadaynta badeecadda iyo habraacyadeeda, waxaa lagu baahiyay mareegta WHM(http://slmof.org)

- Foomka Cadaynta Badeecadda (GDF);
- Foomka Labaad ee Cadaynta marka uu ka hore kaa buuxsamo (GDF Continuation Sheet);
- Talaabooyink Buuxinta Nidaamka Cadaynta);
- Macluumaadka Nidaamka Cadaynta (GDP Information Leaflet)
- Hagayaasha Nidaamka Cadaynta (GDP Guidance Notes)

Dhamaan dukumantiyadaa aan kor ku xusay, sidoo kale waxaad ka heli kartaan. Haanta dukumentiyada (Flash drive) oo la idinsiindoono marka uu tababarku idiin dhamaado.